

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJKA

SAYNIS

FASALKA KOWAAD



F.A.

SAYNIS

FASALKA KOWAAD

1

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

**Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta isga helin
Ogolaansho**

DAABACAADDII LABAAD

**Waxaa lagu daabacay
Madbacadda Qaranka
Xamar, 1970.**

XUS

*Buuggan waxanu ku sharrifaynaa,
kuna xusaynaa Jaalle Maxamed
Xasan Aadan . Gahayr .*

Xoghayihii Wasaaradda Waxbarashada (6dii Diisembar
1974 ilaa 23dii Febraayo 1975).

Jaalle Gahayr wuxu geeriyooday isaga oo fidinaya a-
qoonta Ummadda Soomaaliyeed.

Gahayr iskuma uu koobin xafiisyadii uu hayey hawla-
hooda oo keli ah. Isaga oo guta xilkaa weyn ee saarnaa
ayuu, haddana, ku darsan jirey shaqooyin kale oo fara ba-
dan.

Gahayr wuxu ka soo qayb qaatay samaynta ujeeddoo-
yinka waxbarashada, dejinta manaahijta, qoraalka kutubta
dugsiyada iyo xulidda qalabka waxbarashada.

Haddaba, waxaanu si gaar ah ugu xusaynaa buugagga
Sayniska oo uu ama qoraalkooda qayb libaax ka qaatay, a-
ma manhajka ay ku dhisan yihiin dejintiisa uu wax ku la-
haa.

H O R D H A C

Hore ugama ay dhicin taariikhda dugsiyada hoose ee dal-keenna in maadadda Sayniska lagu barto fasalka koowaad iyo kan labaad midnaba. Imika oo ah markii ugu horraysay ee taas oo kale ay dhacdo, waxa lagama maarmaan noqotay in carruurta fasalka koowaad, oo aan waxna akhriyi karin waxna qori karin, loo dejiyo buug habaysan oo ku abuura xiiso iyo jacayl xagga barashada Sayniska.

Buggan oo loogu talagalay ardayda ku jirta fasalka koo-waad ee dugsiyada Baraymariga ,wuxu yahay mid ku fadhiya habka cusub ee carruurta Sayniska loo baro. Wuxu si weyn wax uga beddelayaa habkii hore ee dugsiyadeenna Sayniska looga baran jiray, wuxu dhiirri gelinayaa in ay carruurta iskood wax u baaraan, wixii ay arkaanna fiiro gaar ah u yeeshaan. Wuxu ilmaha dareensiinayaa in uu saynisku yahay barasho la xiriirta waxyaalaha agagaarkiisa ah ee uu maalin walba arko ama maqlo.

Xafiiska Manaahijtu wuxu mahad weyn u celinayaa **Muuse Xuseen Askar, Cismaan Jaamac Daahir** iyo **Maxamed Saciid Gees** oo buuggan qoray iskuna dubbariday. Waxa kale oo mahad weyn uu u celinayaa **Cabdillaahi Riyaale, Idiris Maxamuud** iyo **Cali Axmed** oo buuggan sawirrada u sameeyey iyo dadkii garaacayba.

**Maamulaha Xafiiska Manaahijta
Bashiir Faarax Kaahiye**

CAAFIMAADKA ILKAHA



MAYA



HAA

CAAFIMAADKA ILKAHA




MAYA



HAA

CAAFIMAADKA INDHAHA



MAYA



HAA



MAYA




HAA




Nal aan aad u caadayn.

MAYA



HAA



MAYA

MAYA



MAYA



HAA

CAA FIMAADKA DHEGAHA



MAYA



HAA

CAA FIMAADKA SANKA



MAYA



HAA

CAAFIGAADKA SANKA



C. Heeg
MAYA



HAA

NADAAFADDA JIDHKA



HAA



HAA

NADAAFADDA JIDHKA



HAA



HAA

CAAFIMAADKA CAGAHA



MAYA




MAYA





HAA



HAA

AYAM

CAAFIMAADKA TIMAHA



HAA



MAYA



HAA

NADAAFADDA DHARKA





MAYA



HAA

HURDADA, NASASHADA IYO CIYAARTA



SAMAYSKA JIDHKA




MAYA



HAA

SAMAYSKA JIDHKA




MAYA




HAA

CIYAARTA



FIIRSASHO (I)



Fiiri Sawirkan

Immisa qof baad aragtaa?

Immisa albaab?

Immisa daaqadood?

Maxay ardadu qabanayaan?

FIIRSASHO (2)




Immisa shay ayaad ku aragtaa sawirkan?

Sheeg magacyadooda.

Maxay gabadhu qabanaysaa?

FIIRSASHO (3)



Sheeg waxyaabaha aad sawirkan ku aragto.

Maxay qabanayaan dadka sawirkan ku jiraa?

QAYBINTA IAAD



U fiirso waxa sawirkan ku yaal.

Ma ku aragtaa waxyaabo isku mid ah?


Immisa siyood ayaad u kala qaybin lahayd?

QAYBINTA 2AAD

Alaabta macallinku ku tuso u kala qaybi mar:-

- (1) Wixii isku jimidh ah.
- (2) Wixii isku miisaan dhaw.
- (3) Wixii isku qaab ah.
- (4) Wixii isku samays ah.

QAYBINTA 3AAD




EEG SAWIRKAN.

Kuweebaa noole ah kuweese manoolah?

Sheeg magacyada mid walba.

Maxaa nooluhu manoolaha kaga duwan yahay?


QAYBINTA 4AAD



Sawirkan immisa waxbaa manoolah?

Inta noolaha ah, kuweebaa xayawaan ah?

Manooluhu intaa ma sameeyaa?



Sawirkani noole miyaa mase waa manoole?

Ma dhirbaa, ma xayawaan baa?

Waayo?

QAYBINTA 5AAD



Waxan oo dhammi waa wada noole.

Nooluhu cunto, biyo iyo hawo ayuu
u baahan yahay.

Nooluhu wuu isdhalaa.

Nooluhu wuu dhintaa.

Manooluhu intaa ma sameeyaa?

QAYBINTA 6AAD

DHIRTA IYO XAYAWAANKA


Xayawaanku wuu socdaa.

Dhirtu ma socoto.


Dhirtu cuntadeeda ayay samaysataa.


Xayawaanku cunto ma samaysto, ee
dhirta iyo xayawaanka kale ayuu cunaa.
Dadku waa noole xayawaan ah.

XAYAWAANKA





Xoolo badan baynu dhaqannaa.






Xayawaan kale ayeynu guryaha ku haysannaa.



Xoolaha aynu dhaqannaa way kala
waaweyn yihiin.



Xooluhu waxay u baahan yihiin cunto.





cuf
shimbireed

aqal

God Dacawo

xuub Caaro Dundumo aboor

Xayawaanku wuxu dhistaa guryo kala duwan.




Xayawaanku wuu koraa.



Hilib




Kalluun





UKUN

Caano




Xayawaanka waxaynu ka helnaa cunto badan.



Xayawaanka waxaynu ka helnaa dhar iyo kabo.

DHIRTA



Dhir fara badan baynu beeranna.
Magacaw kuwa aad halkan ku aragtid.?



Dhirtu way kala waaweyn tahay.
Dhirta qaarba si bay u eg yihiin.






Caleemaha dhirtu way kala duwan yihiin.



Dhirta qaar bay caleentu ka daadataa.



Dhirtu waxay bixisaa ubaxyo kala duwan.



Dhirtu waxay bixisaa miro kala duwan.



Dhirta waxaa laga helaa cunto badan.

Sheeg magacyada cuntadan.

